

# Isbeddelada ku yimid lacag-bixinaha caawimada bulshada caawimada bulshada ee

Aasaasiga ah waxa bixin doona Kela laga bilaabo 2017

## 1 2016 oo dhan, bartaada aad kala xidhiidhayso caawimada bulshadu waxay wali sii ahaan doontaa xafiiska adeegyada bulshada ee xafiiska sooshalka.

- Waxaad ka codsan kartaa caawimada bulshada xafiiska adeegyada bulshada ama ku soo dir codsigaaga online-ka haddii uu ikhtiyaarku ka jiro xafiiska sooshalka.

## 2 Caawimada bulshada ee aasaasiga ah waxa bixin doonta Kela laga bilaabo 1 Janaayo 2017.

- Adeegyada Kela waxa laga heli karaa online, telefoon ahaan, iyo deegaan ahaan iyadoo loo marayo baraha shabakadda adeegyada loo-adeegaha.
- Haddii dawladdaada hoose ay kuu soo dirto go'aan ku saabsan caawimada bulshada dhammaadka 2016, oo muddada ansaxa go'aanka la kordhiyo 2017, waxaad heli doontaa caawimada bulshada sida lagu caddeeyay go'aanka. Waa inaad go'aan cusub ka raadin Kela marka la gaaro sannadka.
- Hayso go'aanka ugu dambeeyay ee aad ka hesho dawladda hoose. Waxaad u baahan doontaa marka aad ka raadinayso caawimada nooliga nolosha aasaasiga ah Kela waqtiga kuugu horeeya.
- Dawladda hoose waxa laga yaabaa inay sii waddo kabidda caawimada bulshada ee kharashaadka gaarka ah ee anay daboolin caawimada nooliga nolosha aasaasiga ahi.

## 3 Macaluumaad dheeraad ah waxa bixin doonaa Kela iyo dawladdaada hoose.

- Caawimada telefoonka ee ku saabsan caawimada bulshada ee aasaasiga ah waxa laga heli doonaa Kela dhammaadka 2016.
- Sidoo kale bogga internetka iyo dood koox-eedyo (Fiinish ahaan) ayaa la bilaabi doonaa aakhirka 2016.
- Laga bilaabo bilawga 2017 waxaad ka codsan kartaa caawimada online-ka [www.kela.fi/](http://www.kela.fi/) asiointi (Fiinish ahaan) ama [www.fpa.fi/etjanst](http://www.fpa.fi/etjanst) (Iswidhish ahaan). Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa adeega online-ka si aad u soo dirto dukumentiyada looga baahanyahay codsigaaga. Sidoo kale waxa suurtoagal ah inaad ku codsato foonka codsiga warqadda.

### Nidaamka codsiga waa la fududeeyay

- Xaaladaha u qalmidda caawimadu ismay beddelin.
- Kiisaska intooda badan Kela waxay hayn doontaa macluumaad ku saabsan xaaladaha dheefta ee codsadayasha si shaqsi shaqsi ah, taas oo fududaynaysa nidaamka codsiga. Dukumenti kasta oo loogu soo diro ciwaanka codsiga ee Kela waxa laga yabaa in laga dhigo inay heli karaan maamulada dawladda hoose marka ay u baahdaan.
- Kadib helitaanka codsiga caawimada bulshada ee aasaasiga ah, Kela waxay siisaa go'aan ku saabsan arrintaa 7 maalmood oo shaqo gudohood haddii codsiga ay kujiraan dhammaan macluumaadka loo baahanyahay.

Caawimada bulshada aasaasiga ahi waa micin kama-dambays ah oo kayimaad caawimada cuntada oo loogu talagalay shaqsiyaadka iyo qoyska ku waas oo daboolaa baahiyahayga aasaasiga ah ee nolosha, sida lacagta nooliga nolosha, dharka iyo daryeelka caafimaadka sidoo kale kharashaadka guriyaynta ee macquulka ah.